

Waxbarashada culuunta dabiiciga ah ama sayniska.

Madoonaysaa in aad waxbarashadaada aad sii wadatid kadib marka aad kabaxdid dugsiga sare?

Madoonaysaa in waxbarashadadu ay ahaato mid asaaskeeda hoose aad uga dhisan, kadibna aad horumar baladhan aad sii sameysid?

Madoonaysaa in aad heshid fursad shaqo ama in aad dalalkale oo dibeda ah aad waxbarasho aad u tagtid?

Madoonaysaa in aad baadhitaano cilmiyeesan, iyo tijaabooyin aad sameysid?

Madoonaysaa in aad baratid mawdoocyada maanta aad looga doodo ee bulshaweynta u mihiim ah?

Sidaas daraadeed waxa aytahay waxbarshadan culuunta dabiiciga ah mid adiga kugu haboon. Marka laga reebo waxbarashadan ah barashada dabiicig ah, waxaad fursad aad u helaysaa in aad sameysid baadhitaan cilmiyeed, qiimeen, iyo adigoo mawqifyo ka qaadanaya qadiyado, iyo su aaloyin isweydaarsi ah, ha noqoto mid gaar ah ama mid guud.

Waxay noqonkaraan su aaluhu tusaalo ahaan qaar ku salaysan horumarinta bulshada ama caafimaadka. Mudada aad wax barashada aad ku jirtid waxaad heli doontaa fursado aad kaga doodi su aalooyinka xasaasiga ah, sida tusaalo ahaan tijaabooyinka xayawaanka lagu sameeyo, daryeelitaanka bini aadanka. Tijaabooyinka shaqo waa mid laxidhiidh waxbarshada. Kuwaas oo noqon kara kuwo baadhitaano laxidhiidha, tijaabooyin, ama in aad dalalkale aad u safartid oo markaa aad aqoon cilmi aad soo u ruurisid. Mararka qaarkood waxaa dhacda in ardaygu uu isagu noqda mid kaligii sikufilan, waxaa kaloo dhicikarta in ardaygu uu helikaro faah-faahino dheerad ah oo laxidhiidha casharadiisa si uu u fahmo.

Aqoontan culuunta dabiiciga ah ama sayniska waxa aad ka baranaysaa cilmi aad u balaadhan, marka laga reebo xisaabta, ama sayniska, cilmigan oo aad kabarkanaysid sayniska guud iyo juqraafiga, taariikhda iwm.

Waxaakale intaas siidheer in luqadaadu ay isbedel balaadhan ay samaynayso siina xoogeysan doonto.

In aad shaqeysid ama aad waxbarashadaada sii wadatid.

Waxbarashadan culuunta sayniska waxa ay kuu sii fududaynaysaa, haddii aad dooneysid in aad wax barashadaada aad sii wadatid. Marka aad dhamaysatid waxbarashadan dugsigasare. Waxa aad dalban karaysaa waxbarashooyin kaladuwan oo heer jaamacadeed ah. Waxaad kaloo dooran kartaa in aad ku takhasuustid maadooyinka kala ah sida sayniska, xisaabta, caafimaadka, iyo farsamooyin kaladuwan.

Shaqooyinka aad helikaraysid.

Waxa ay ku xidhantahay waxa aad dooratay in aad baratid kadib marka aad dugsiga sare aad dhamaysid, kadib markaas ayaad dooran karaysaa shaqooyin badan oo kaladuwan.

Waxbarashadu waxa ay ka koobantahay casharo. Casharada qaarkood waa qasab in dhamaan ardayda oo dhami in ay ka qeybqaataan. Casharada in tooda kale waxa ay u gaar yihiin oo kaliya waxbarashadan culuunta sayniska ah. Waxa intaas raacsiyiisan casharo kale oo aad adigu gaar u doorankartid.

Waxbarashadani waxa ay leedahay sadex qaybood oo waxbarasho dugsiiyeed kala duwan ah. Taas oo ah ardeyda degen dhamaan dalka oo dhan in ay gelikaraan.

Dugsiyadasare qaar kood waxa ay yeelan karaan waxabarasho kale oo u gaar ah, ku waas oo laga yaabo in ay adiga ay kuu mihiimyihiin. Waxaad kala tashataa oo aad weydiin karaysaa qofka u qaabilsan waxabarashooyinka dugsiyada (studie och yrkesvägledare).

Waxbarashada guud waxa ay noqon karaysaa. sida

Xisaabta iyo daa-tooyinka (kombuutarada). Gaar ahaan waxa ay khusaysaa ardayga jecel in uu sii kororsado waxbarasho dheeraad ah sida, xisaabta, cilmiga kombuutarada, iyo cilmiga warbaahinta.

Barashada dabeecada- waxa ay gaar ay u tahay ardayda jecel in ay bartaan ama xiisaynaysa dabeecada aanu ku noolnahay ama khayraadka dhulka kujira, islamarkaana jecel inay bartaan cilmiga horumarinta bulshada kaas oo ah mid habdabiici ah, iyo daryeelka bulshada , iyo wixii lahalmaala dhaqaalaha.

Culuunta Sayniska-Waxa ay gaar ay u tahay ardayda jecel in ay sii balaadhiyaan aqoonta culuunta sayniska ah, iyagoo markaas siibaranaya sida fiisigiska, kimistariga, iyo bayoolajiga.

Xidhiidhka suuqa shaqada.

Tababar xirfadeed shaqo lama socoto wax barashadan, waxbarashada intoo dabadan waxaa loo diraa ardayda goobo tababaro oo aqoon koror si ah, kuwaas oo ku sameeya tababaradaas goobaha shaqooyinka. laakiin waxaa dhici karta in meel kale lagu habeeyo oo aad tababar gaaban aad ku sameysid mudada aad dugsiga sare aad dhiganaysid.

Waxa ay laakinse ay ku xidhantahay wax aad baranaysid iyo casharada aad dhiganaysid.

Mustaqbalka shaqooyinka.

Waxabarashada cilmiga culuumta sayniska ee heer jaamacadeed waxa uu ku fududeenkaa fursado aad u badan oo aad shaqooyin aad ku heli kartid. Maanta wakhtigan lajoogo waxaa jira fursado shaqooyin oo aad u badan oo laxidhiidha farsamada(technikada), sida daatooyinka, farsamada warbaahinta, dhakhtarnimada, dhakhtarka ilkaha.

Waxaad su aalikaaraysaa wixii intaas dheer haddii aad su-aalooyin aad qabtid qofka u qaabilsan waxbarashada iskuulada ama dugsiyada(studie –och yrkesvägledare) kuwaas oo aad kala tashankartid wax barashada aad dooneysid in aad baratid.